



## YAA LOOGU TALAGALAY OO YAAN LOOGU TALAGALIN TALLAALKA MA OGTAHAY?

### *Ma jiraan kooxo dad ah oo AAN QAADAN karin tallaalka COVID-19?*

- **Carruurta da'doodu ka yar tahay 16 sano:**

\_tallaalku looma sharciyeyn doono in ay isticmaalaan carruurta da'doodu ka yar tahay 16 sano jir maxaa yeelay tijaabooyinka badqabeed ee kooxdan lama samayn Carruurta la ildaran xaaladaha caafimaad ee iyaga u galiya halista ugu weyn ee dhibaatooyinka COVID-19 ayaa la tixgelin doonaa ka dib marka ugu horreysa ee tallaalka laga baxo mark la helo caddeyn dheeraad ah.

- **Haweenka uurka leh iyo kuwa naaska nuujinaya:**

Sidii caadiga ahaydba tijaabooyinkii ugu horreeyay ee tallaallada, tallaalka COVID-19 si gaar ah looguma tijaabin haweenka uurka leh iyo kuwa naaska nuujinaya. Ma jiraan haddeertan wax caddeyn ah oo ku filan oo lagu talin karo in dhammaan haweenka uurka leh ay si joogto ah u helaan tallaalkan maadaama daraasado lagu baarayo saameynta tallaalka ee uurka ee xoolaha ay weli socdaan.

Intaas kadib, faa iidooyinka suurtagalka ah ee tallaalku waxay si gaar ah muhiim ugu noqon karaan haweenka uurka leh qaarkood ee halista sare ugu jira dhibaatooyinka daran ee ka yimaada COVID-19 ama kuwa halista sare ugu jira inay qaadaan COVID-19 **Haweenkan waxaa lagula talinayaa inay kala hadlaan dhaqtarkooda ayna go'aansan karaan inay qaataan talaalka.**

**Haweenka uurka leh ee aan halista sare ugu jirin inay qaadaan COVID-19 / la kulmi karaynin dhibaatooyin daran oo ka yimaada COVID-19 waxaa lagula talinayaa inay dib u dhigaan tallaalka illaa inta uurkoodu dhammaanayo..**

Ku saabsan **naas nuujinta**, ma jiraan macluumaad badbaado oo la heli karo oo ku saabsan tallaalka inta lagu jiro naasnuujinta ama carruurta naaska la nuujinayo. Iyadoo ay taasi jirto, tallaalka looma maleynayo inuu khatar ku yahay ilmaha naaska nuugaya. Haweenka naas nuujinaya ayaa go'aansan kara inay qaataan tallaalka, ama waxay dooran karaan inay dib u dhigaan tallaalka illaa ay ka dhammaystirayaan naas-nuujinta ilmahooda.

### *Ma jiraan xaalado aan DIB U DHIGAYO qaadashada tallaalka?*

- Hadaad tahay **qof aad u xanuunsan**, waa inaad dib u dhigtaa qaadashada tallaalka illaa aad ka bogsato. Hubso inaad u sheegto khadka caawinta tallaalka COVID-19 lambarka 145 haddii aadan iman karin ballanta tallaalkaaga. Tani waa si lagu siiyo ballan kale oo booskaaguna uusan noqon mid khasaara.
- Haddii aad si fudud u xanuunsan tahay oo aadan qabin xummad ama calaamado kale sida qarqaryo, lallabbo, matag ama shuban, uma baahnid inaad dib u dhigto qaadashada tallaalka.
- Haddii aad isku aragto wax calaamado ah oo la xiriiira COVID-19 (qandho, qufac, neef-qabad, daal, cuno-xanuun, sanko oo dareera / xirma, madax-xanuun, murqo-xanuun, urinta waayid, dhadhan la'aan, shuban ama matag) waxaa lagugula talinayaa inaad wacdo 111 si loo diyaariyo baaritaanka suufka sanko la galiyo oo aad u hesho talo dheeraad ah. Fadlan ha u soo xaadirin tallaalka haddii aad leedahay calaamado suurtagalinaya COVID-19 ama haddii natiijada baaritaanka suufkaaga ay wali socoto.

- Hadaad tahay **qof boositif COVID-19 ah**, waa inaad dib u dhigtaa qaadashada tallaalka illaa aad ka bogsato iyo ugu yaraan 4 toddobaad laga bilaabo markii ay calaamadahaagu bilaabmeen.

**Kuwa soo socda ayaa lagula talinayaa inay la hadlaan dhakhtarkooda ka hor intaydan qaadan tallaalka COVID-19:**

- Hadaad qaadanaysid daawo dhiiga khafiifisa
- Haddii aad ku xanuunsato cillad dhiig-bax ah ama dhiig-xinjijeyaal si hoos u shaqeynaya
- Dadka qaba HIV iyo dadka qaata daawooyinka xakameynaya nidaamka difaaca jirka waxaa lagu dhiirigelinayaa inay qaataan tallaalka laakiin waa inay la hadlaan takhasusyadooda si ay ugu hagaan waqtiga saxda ah ee la qaadanayo tallaalka.

**Miyay tahay in dad hore looga heley cudurka 'Covid-19' waagii hore ay qaataan tallaalka?**

Ma jiro macluumaad sax ah oo ku saabsan inta uu jirka ka difaacayo infekshanka dabiiciga ah. **Sidaa darteed, dhammaan kuwa ka bogsaday infekshanka COVID-19 waxaa lagula talinayaa inay qaataan tallaalka.**

*UNHCR Malta maaha isha rasmiga ah ee macluumaadkan. UNHCR Malta ayaa tarjuntay macluumaadkan, si ay kuugu suurto gasho inaad ku hesho luqad aad fahanto, isla markaana aad kula wadaagi karto qaxootiga iyo magangalyo-doonka ku sugan Malta.*

***Wixii dheeraad ah oo la turjumay macluumaadka ku saabsan Tallaalka COVID-19 fadlan booqo***

***<https://www.unhcr.org/mt/news/covid-19-information-for-malta>.***

*Xigasho: Agaasinka Horumarinta Caafimaadka iyo Kahortagga Cudurada, Malta*

*Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan booqo <https://deputyprimeminister.gov.mt/en/health-promotion/covid-19/Pages/vaccines.aspx>. Degelkan si joogto ah ayaa loo cusbooneysiyyaa hadba sida loogu baahdo.*